



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Maarso 16, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)
Ujeedada: Natiijooyinka Qiimeynta Nidaamka Waxqabadka ee Oregon

Sanadkii 2020, ODDS ayaa raadisay dib u eegis madax banaan oo lagu sameeyo Nidaamka Waxqabadka ee Oregon (OIS) kaasi oo ahaa manhajka wax ka qabashada hab-dhaqanka ee ODDS muddo 23 sano ah. ODDS ayaa qandaraas dibada ah la yeelatay Machadka Farsamada ee Oregon si u sameeyaan qiimeynta buuxda ee OIS si loo qiimeeyo in OIS ay la jaanqaadi karto aragtideena dadka reer Oregon ee qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD) ee ah in ay awoodaan helitaanka taageerooyin tayo leh oo ay fududahay in la isticmaalo isla markaana jawaab u ah kartidooda, baahiyahooda iyo waxyaabaha ay kala dooranayaan.

Warbixinta kama dambeysta ah, “Assessment of OIS Training, Systems, and Curriculum,” waa mid dhammeystiran waxaana laga arki karaa <https://go.usa.gov/xzBPW>. Haddii aad u baahan tahay dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso, ODDS kala xiriir 503-945-5811.

Anaga oo ah ODDS waxaanu ka mahad celinaynaa jawaab celinta ku jirta warbixinta. ODDS waxay warbixinta iyo talooyinka dheeraadka ah ee laga soo ururiyay ilaha kale, sida hawl-wadaagayaasha, daryeel bixiyayaasha iyo xubnaha ka tirsan bulshada u isticmaali doontaa si la iskugu wargeliyo tallaabooyinkeena xiga:

- Cusbooneysiinta manhajka OIS, tababar kaiyo shahaadada waa in ay waafaqsan yihiin xeerarka maamulka iyo hababka ugu fiican ee wax loogu dhaqmo ee loogu talagalay waxqabadyada hab-dhaqanka wanaagsan iyo taageerooyinka.
- Horumarinta shuruudaha qandaraaska OIS oo cusub si loo xaqiijiyo in OIS uu dhaqan ahaan xasaasi yahay, loo dhan yahay oo si fudud loo baran karo.
- Isku wargelinta raadintena loogu talagalay kala doorashada manhajka wax ka qabashada hab-dhaqanka ee kale si ay daryeel bixiyayaashu u isticmaalaan.

ODDS waxay sidoo kale Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon Xafiiskeeda Qandaraasyada kala shaqeynaysaa sii deynta codsiyada soo jeedinta iyo hore u sii wadida shaqadani muhiimka ah. Mid kasta oo ka mid ah isbeddeladani waxay ODDS ka caawin doonaan in ay si fiican ugu adeegto dadka reer Oregon ee qaba I/DD iyo qoysaskooda.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la,

dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.